Minnesota Department of Education

MACLUUMAADKA DHEERAADKA DEEQDA WAXBARASHADA ABABINTA

MACLUUMAADKA DHEERAADKA: ARJIGA PATHWAY I – DEEQAHA WAXBARASHADA ABABINTA

WAAX MAXAY DEEQDA WAXBARASHADA ABABINTA?

Pathway I – Deeqda Waxbarashada Ababinta waxa ay kaa caawin kartaa bixinta daryeelka caruurta ee tayada sare leh iyo waxbarashada ababinta taaso kugu caawinaysa in uu canuggaaga dugsiga ugu diyaargaroobo. Lacagta deeqda waxbarashada waxaa si toos ah loogu dirayaa barnaamijka daryeelka caruurta ama deeqda waxbarashada ababitna ee aad dooratid. Deeqda waxbarashada waxaa loo isticmaali karaa barnaamijka mutaystay saddex ama afar Xiddig Waalidku ka qaybqaadanaya Xog-ogaalka.
Ka warqabka Waalidku (Parent Aware) waa shay cabbiraya in uu waalidka ka caawiyo doorashada barnaamijyada daryeelka caruurta iyo waxbarashada ababinta ee tayo sare leh. Malcuumaad dheeraada ee ku taxluqa Xog-ogaalka Waalidka gal http://www.parentaware.org.

XAGGEEBUU CANUGGAYGA KA ISTICMAALI KARAA DEEQDA WAXBARASHADA?

Waxaa laga isticmaali karta Pathway I – Deeqda Waxbarashada Ababinta ee barnaamij kasta ee daryeelka caruurta ama waxbarashada ababinta aad u qalantid ee Minnesota kuwa **mutaystary helid Heerka saddex ama afar Xiddig ee Xog-ogaalka Waalid (Parent Aware)**. Waxa la rajeynayaa in deeqda waxbarashada loo isticmaalo meelaha si joogto ah loo imanaayo.

Qasab maaha in aad barnaamij dooratid marka aad deeqda dalbanaysid, fadlan la soo xariir Maamulaha Gobolka ee deeqdaada waxbarashada ee hoos ku qoran. Haddii canuggaaga uu waqtiga xaadirka uu qaato baarnaarnij balse doonaysid in aad indhoindheyso fursado kale, sidoo kale tanna waa ay kaa caawin karaan.

Lacagaha deeqda waxbarashada waxaa ay ku salaysantahay heerka cabbirka barnaamijka Xog-ogaalka (Parent Aware) ee aad dooratid. Qariiradda hoose waxa ay muujinaysaa lacagaha heerka cabbirka ku salaysan:

Barnaamijka Heerka Cabbirka Waalidka Xog-ogaalka	**Abaalmarinta Deeqda Waxbarashada**
Afar-Xiddig Heerka Waalidka Xog Ogaalka	Illaa iyo $7,500 canuggiiba
Saddex-Xiddig Heerka Waalidka Xog Ogaalka	Illaa iyo $5,000 canuggiiba

~~Hirgalaysa Luulyo 1, 2016, barnaamijyada waa shardi in ay helaan cabbirka Waalidka Xog-ogaalka ah (Parent Aware) oo 3 ama 4 xiddig si haq loo yeesho helitaanka deeqaha waxbarashada. Deeqaha Waxbarasho ee la ogolaaday ka hor Luulyo 1, 2016 waxaa loo isticmaali kara barnaamijyada cabbirka hoos yahay inta loo qoondeeyey deeqda sida hoos ku cad ilaa inta la jadiidinayo deeqda waxbarashada.~~

Haal ama Laba-Xiddig Heerka Waalidka Xog Ogaalka	Illaa iyo $4,000 canuggiiba
Isku Qoridda Aqoonsanaanta Waalidka, Balse aan qaadan Heerka Xiddigta	Illaa iyo $3,000 canuggiiba

SIDEE KU DALBADAA?

Si lagu dalbado Pathway I – Deeqda Waxbarashada Ababinta ee canuggaaga, tallaabooyinkaan raac:

- ☐ Dhammaystir macluumaadka ku qoran bogagga 1-3. Macluumaadka shuruuddaa waxaa lagu caalameeyay bar.
- ☐ Maraad Aqriso saxiix heshiiska iyo oggolaashaha barnaamijka ee macluumaaka lagu siidaynayo bogagga 4-6.
- ☐ Arjiga la buuxiyay boostada ugu dir (bogagga 1-6) Maamulaha Gobolka ee degaankaaga.

CANUGGAYGA MA U QALMAA?

Si aad ugu qalantid **Pathway I – Deeqda Waxbarashada Ababinta**, waa shardi in aad tahay waalid, ilaaliyaha rasmiga ah ama hawlwadeenka Hay'adda canugga/caruurta iyo in qoyskaagu uu buuxiyaa shuruudahaan. **Arjiga caruurta ku jirta xanaanada ku meel gaarka waa uu saxiixaa soona gudbiyaa hawlwadeenka hay'adda.**

DEGMADA

Si aad ugu qalantid helida deeqda waxbarasha waa in aad leedahay cinwaan/adres Minnesota.

DAKHLIGA

Waa in aad soo gudbisid caddaynta ah:

☐ Canuggaaga in uu ka tirsanyahay mid ka mida barnaamijyadaan soo socda:

- Barnaamijka Maalgalinta Qoyska ee Minnesota (MFIP)
- Barnaamijka Gargaarga Daryeelka Caruurta (CCAP)
- Barnaamijka Qadada Lacagla'aana iyo Qiimaha La Dhimay (FRLP)
- Barnaamijka Cuntada ee Daryeelka Caruurta iyo Masuuliinta (CACFP)
- Barnaamijka Qaybinta Cuntada ee xerooryinka Hindida
- Kaalmada Cuntada (SNAP)
- Xarunta Ababinta (Head Start)
- Korinta Sharciysan (Foster Care)

< AMA >

☐ Dakhliga qoyskaaga waa in uu la' egyahay ama ka yaryahay 185% ee heerka federaalka u taqaano saboolnimo sanadka lagu jiro. Qariiradda hoose waxa ay ku salaysantahay FY2015 ee xeerarka u deggan saboolnimada Diiwaanka Federaalka (Federal Register) ee la daabacay Janaayo 25, 2016.

Tirada Qoyska	**Dakhliga Dhan**	**Tirada Qoyska**	**Dakhliga dhan**
2	$29,637	6	$60,273
3	$37,296	7	$67,951
4	$44,955	8	$75,647
5	$52,614	9*	*$83,343*

Tirada qoyska ee kooban wax sideed xubnood ka badan, ku dar $7,696 xubin kasta ee dheeraada.

*Eeg Tirada Qoyska ee 9 tusaale ahaan.

Xubnaha qoyska ka tirsan waxaa ku dadka dhan ee deggan guriga, qaraabo ama qaraabo la'aan (sida waalidiinta waalidiintood, qaraabo kale, ama saaxiibo) ee idinla wadaaga dakhliga iyo kharashka. Codsadayaashu waa in ay isku daraan laftikoodu iyo dhammaan caruurta la nool. Qoyska kama tirsana dadka kale ee dhaqaale ahaan isu filan sida saxiibka qolka-waaga.

CANUUGA

Waxa shardi ah in aad tahay waalidka, ilaaliyaha rasmiga ama hawlwadeenka hay'adda iyo qoyska shardi ku ah in uu leeyahay:

☐ Canug saddex ama affar sano jirsado Sateembar 1, ~~2016~~ 2017, welina uusan u qalmin waxbarashada ababinta.

AMA

☐ Waalidka uu ka yaryahay 21 sano, iyo uu dhiganayo dugsi sare ama warxbarashada u dhiganta (GED), iyo uu dhalay canug dhalashada illaa laba sano jir ah. Waa shardi in aad keento qoraal caddayn ah in aad dhigatid dugsi sare ama GED. Qoraal caddayn ah macnaheeda waa nuqulka warqad rasmi ah (magaca hay'adda kor ku qorantahay) ee hay'ad (magacooda ku qoran) ee aad hadda aadid.

☐ Walaalka yar waxaa dhici karta in uu u qalmo deeqda waxbarashad haddii ay iyaga ku jiraan isla barnaamijka waalalkooda ka weyn ee deeqda waxbarashada haysta. *("Walaalka" waxaa lagu qeexay canug la wadaago mid ama labada waalidka xagga isirka, guurka ama korinta sharciyaysan, ay ku jiraan walaalaha sida ay ku qeexantahay koodka canugga qabiilkiisa ama dhaqankiisa.)*

LIISTADA AAD LA XARAYNAYSO ARJIGAADA

Dib u eeg liistada ku calaamaysan hoos si aad u hubsatid in aad haysatid waxa kasta ee aad arjigaaga looga baahantahay:

☐ Dhammaystir qaybaha shardiga ah oo idil ee arjiga deeqda waxbarashada. Qaybaha calaamadda barta leh (*) waa shardi in la buuxiyo. Macluumaadka kale oo idil waa shardi.

☐ Ku soo lifaaq dukumiintiyada idil ee taageerada ah dhinaca dambe ee arjiga deeqda waxbarashada. Dukumiintiyada taageerada waxaa ka mida:

- Caddaynta dakhliga:
  - Caddaynta canugga ka tirsanaantiisa barnaamij ku qoran bogga 3.
  - AMA
  - Caddaynta dakhliga.
- Haddii aad ka yartahay 21 sano jir iyo aad canuggaaga da'diisu tahay dhalasho illaa laba sano jir aadna codsanaysid deeqda waxbarashada:
  - Waa shardi ah in aad keento qoraal caddayn ah in aad dhigatid dugsi sare ama GED – Nuqulka warqad rasmi ah (magaca hay'adda kor ku qorantahay) ee hay'ad aad hadda ka qaybgashid.

☐ Si fiican u aqriso qaybta Heshiiska iyo Oggolaashaha, ay ku jiraan heshiiska ah in la addeeco shuurdaha barnaamijka, oggolaashaha siidaynta macluumaadka, iyo in aad ka qaybqaadatid qiimaynta.

☐ Si fiican u aqrisatid Digniinta Tennessen (Tennessen Warning).

☐ Xarfaha magaca ku qortid, ku saxiixdid iyo taariikhaysid arjga deeqda waxbarashada.

☐ Dib u xaqiiqsato arjiigaaga deeqda waxbarashada. Shayaha laga tagay waxaa dhici karta in ay dib u dhac sababaan. Hayso nuqulka arjiga deeqda waxbarashada iyo lifaaqyada noqonaya xogtaada.

☐ Caruurta ku jira xanaanada kumeelgaarka ah, shaqaalaha hay'adda hanaanada waa in uu saxiixo arjiga kuna sheego degganaasha dugsiga degmada ee canugga/canugta ama caruurta qoyska.

ARJIGAAGA XARAYSO

Ku dir boostada ama gacantaada ku soo qaad arjiga dhammaystiran iyo dukumiintiyada shuuradaha idil oo u gudbi Maamulaha Goboleed ee degaannada hoos ku qoran. Arjiyada fakiska ama iimeyllada lagu diro looma tixgelinayo helitaanka deeqda waxbarashada. Maamulaha Goboleed ayaa warqad uu kuugu sheegaya haddii canuggaaga ama caruurtaada ay u qalmeen Pathway I Deeqda Waxbarashada Ababinta kuu soo diri doona. Haddii aad suu'aalo qabtid, Maamulaha Gooleed la soo xariir.

MAAMULAHA GOBOLEED
THINK SMALL 10 YORKTON COURT, ST. PAUL MN 55117 651-641-6604

OGGOLAASHAHA XOGTA LA WADAAGAYO

Si arjigaaga lagu oggolaado iyo deqdaada waxbarashada lagu meelmariyo, waa shardi in macluumaadka qaarkood ee aad na siisay in aannu la wadaagno dhinacyo kale:

Waa Kuma	Waa Maxay	Sabab	Shardi/Qiyaar
Daryeelka caruurta/ barnaamijka waxbarashada ababinta canuggu uu ku qoranyahay.	Canugga magaciisa, cinwaankiisa, macluumaadkiisa, waxbarashada waalidka, iyo macluumaadka dakhliga ee arjiga laga guuriyay, u qalmidda iyo lacagta mid kasta ee abaalmarinta Deeqda Waxbarashada Ababinta.	U oggolaatid in deeqda waxbarashada lagu bixiyo daryeelka canugga ama waxbarashad ababinta ee canugga barnaamijkiisa.	Oggolaashaha Shardiga Ah
Canugta dugsiga deegaankeeda	Canugta magaceeda, cinwaankeeda, taariikhdeeda dhalashada, jinsigeeda, iyo xitaa waalidka/ilaaliyaha rasmiga magacooda iyo cinwaanka ku qoran foomka deeqda.	In canugta lagu qoro lambar qaas ah ee Aqoonsiga Ardada Gobolka Idil (SSID) kaaso ay isticmaali doonaan Maamulaha Goboleed iyo Waaxda Waxbarashada ee Minnesota (MDE) si canugta lagu aqoonsado iyo lacagta deeqda waxbarashada lagu sharciyeeyo.	Oggolaashaha Shardiga Ah
Waaxda Waxbarashada ee Minnesota (MDE)	Canugga magaciisa, cinwaankiisa, maclumaadkiisa, waxbarashada waalidka, iyo macluumaadka dakhliga ee arjiga laga guuriyay, u qalmidda iyo lacagta mid kasta ee lacagta Deeqda Waxbarashada Ababinta, heerka barnaamijka Waalidka Xogogaalka ee canugga uu ku qoranyahay, canugga lambarkiisa SSID, iyo u adeecnaanta shuruudaha barnaamijka.	Si loo go'aansado canugga u qalmiddiisa ee Pathway I – Deeqda Waxbarashada Ababinta iyo loo maamulo barnaamijka deeqda waxbarashada ee gobolka oo idil.	Oggolaashaha Shardiga Ah
Qiimeeyaha Barnaamijka Deeqda Waxbarashada	Canugga macluumaadka foomka Pathway I – Deeqda Waxbarashada Ababinta, canugga u qalmiddiisa ee lacagta Deeqda Waxbarashada Ababinta, iyo barnaamijka meesha uu canugga ku qoranyahay. (Ma jirto warbixin guud ee lagu bixinayo in lagu aqoonsanayo macluumaadka qaaska ee shaqsiyeed ee canug kasta.)	Si lagu qeexo sida dhaqaalaha deeqda waxbarashada, sida qoysaska ay ku helaan macluumaadka barnaamjika deeqda waxbarashada ku taxluqa, iyo barnaamijka saamantiisa horumarka canugga ama u diyaargarowga dugsiga.	Oggolaashaha Qiyaarka Ah

- Dhinacyada oo idil waa in ay addeecaan asturnaanta xogta ee Minnesota iyo sharciyada shaqsiga gaarka u ah marka la adeegsanayo macluumaad kasta ee barnaamijkaan lagu wadaagayo.
- Macluumaadka la siidayn doono kuma ay jiraan macluumaadka taageerada ee arjigaan lagu lifaaqay.

Oggolaashaha Shardiga Ah: Shardi iguma aha in aan oggolaado la wadaagidda macluumaadkaan, balse haddii aan doortay in aan yeelin, waxa aan fahamsanahay in canuggayga /caruurtayda, aysan fursad u yeeli doonin in ay ka qaybqaataan Pathway I - Barnaamijka Deeqda Waxbarashada Ababinta.

Oggolaashaha Qiyaarka Ah: Diidmada oggolashaha in aan ka qaybqaato qiimaynta saamayn kuma yeelanayso u qalmiddayda ah in aan helo Pathway I - Deeqda Waxbarashada Ababinta.